

Daawooyinka Qaaxada Qarsoon (Latent TB): Isoniazid (INH)



Waxaad kaliya qaadan doontaa daawadaada hal mar toddobaadkii ilaa muddo 9 toddobaad ah.

Waxaad isku mar la qaadan doontaa kiniinkaaga maalinlaha ah

U sheeg dakhatiirtaada kale inaad daawo u qaadanayso qaaxada qarsoon (LTBI)

| Daawada | Tirada kiniinka maalin kasta |
|-----------|------------------------------|
| Isoniazid | |

Waxaan maalin kasta qaadan doonaa daawadayda muddo 9 bilood ah



Waxaad qabtaa qaaxo qarsoon oo ah nooc ka mid ah caabuqa qaaxada. Ma qabtid cudurka qaaxada oo mana u gudbin kartid dadka kale. Daawadaan ayaa kaa caawin doontaa ka hortagga cudurka qaaxada ee firfircoon.




Wac kalkaalisadaada caafimaadka haddii aad qabto su'aalo ama waxyeello:



JOOJI qaadashada daawooyinkaaga isla markaaba oo WAC kalkaalisada cudurka qaaxada haddii aad qabto mid ka mid ah dhibaatooyinka hoose:

- Cunto yari ama oomateeg la'aan
- Calool xanuun ama calool kacsanaan
- Lalabbo ama matag
- Kaadida midabka koolaha u eg ama saxaro
- Maqaarka ama indhaha oo jalle noqdo
- Nabaro ama dhiigbax
- Jidhidhico iyo kabuubyo gacmahaaga ama cagahaaga ah



Tallooyin ku aadan qaadashada INH

- Samayso alaarm si uu ku xasuusiyo inaad qaadato daawadaada
- Ka codso xubin qoyska ama saaxiib inuu ku xasuusiyo
- La hadal dhakhtarkaaga haddii aad cabto khamri, khamrigu wuxuu keeni karaa waxyeelooyin kale
- U sheeg dhakhtarkaaga dawooyinka kale ee aad qaadato
- Weydii kalkaalisadaada haddii aad wax su'aalo ah qabto